



## Abaalmarinada & Isa sharfidda: Ardayada sanadkii u dambeeyay dhigata Lincoln oo loo magacaabay Ardayada Sanadka ee Suxufinimada ee Oregon

Ardayada sanadkii u dambeeyay dhigata Dugsiga Sare ee Lincoln ee Sagarika Ramachandran ayaa loo soodrtay in ay tahay ku guuleystaha Abaalmarinta Ardayada Sanadka ee Suxufinimada ee Oregon. Sagarika, oo sidoo kale ah ah tafaftiraha guud ee wargeyska ardayda ee Lincoln, ee Cardinal Times, ayaa noqotay suxufiyadii u horreysay ee ka socota dugsiga PPS oo ku guuleysata abaalmarinta, taasi oo soo bilaabantay 2005-kii.

Abaalmarinta waxaa si wadajir ah u soo qaban qaabiyay Ururka Waxbarashada Suxufinimada ee Oregon iyo Ururka Saxaafadda Scholastic ee Northwest. Musharixiinta waxaa garsoore ahaan lagu kala saarayay 11 qaybood. Guusha ay guuleysatay, Sagarika waxay u qalantaa Abaalmarinta Ardayada Sanadka ee Suxufinimada ee Qaranka.

**Horyaalka Tartanka Higaada:** Agatha Chang, oo ah ardayad fasalka toddobaad oo dhigata Winterhaven K-8, ayaa ku guuleysatay Tartanka Goboleedka Higaada ee Pamplin Media Group oo ka dhacay Hollywood Theatre. Agatha waxay si sax u higaadisay kalmada “Persian” taasi oo ahayd wareegii u dambeeyay si ay uga guuleysato 43 arday oo kale oo ka socda degaanka Portland si ay boos uga hesho Tartanka Higaada Qaranka ee Scripps oo Maajo lagu qaban doono Washington, D.C.

Saddex arday oo kale oo ka tirsan PPS ayaa ka tartamay dhacdada. Ardayga fasalka toddobaad dhigta ACCESS ee Jackson Morris, ardayga fasalka toddobaad dhigta da Vinci ee Scarlet Hasseries iyo ardayga fasalka toddobaad dhigta Jackson ee Abdullah Al-Jilani.

**Loolanka Buugaagta ‘Battle of the Books’:** Afar dugsi hoose oo ka tirsan PPS ayaa kooxo u diri doona Loolanka Buugaagta ee Oregeon ‘Oregon Battle of the Books’ oo ah tartan gobolka oo dhan ah ka dib markii ay ku guuleysteen tartan goboleedkii bishan. Kooxo ka kala socda James John, Rieke, Abernathy iyo Duniway ayaa ku tartami doona dhacdada gobolka oo Sabtida, April 6 ka dhacaysa Kulliyadda Bulshada Chemeketa ee ku taala Salem.

Kooxahani waxay ka soo gudbeen dhowr tallaabo si ay gaaraan gobolka, iyada oo ku bilaabmaysa in ay ku guuleystaan tartamada dugsigooda si ay ugu soo baxaan heerka gobol, kuwaas oo lagu qabtay afar goobood ayna ka qayb qaateen 85 dugsi, oo ay ku jiraan 49 oo ka socda PPS. Kooxuhu waxay ahayd in ay akhriyaan 16 buug oo la soo xushay ([fiiri liiska cinwaanada](#)) ka hor tartan kasta, ka dibna si wadajir ah uga jawaab su’aalaha.

**Ciyaaryahanka Grant oo ku guuleystay abaalmarinta horyaalka kubadda kolayga ee gobolka.**

Ardayga sanadkii u dambeeyay dhigta Dugsiga Sare ee Grant ee Aaron Deloney ayaa loo doortay in uu yahay Ciyaaryahanka Sanadka ee Gatorade Oregon ee dhanka wiilasha kubadda kolayga. Deloney, oo loo coddeeyay in uu yahay Ciyaaryahanka Sanadka Naadiga Dugsiyada Ka Dhexeeya ee Portland, oo qiyaas ahaan dhaliyay 26 saddexaad xilli-ciyaareedkani isaga oo ka caawiyay Generals in ay si wadajir ah koox horyaalka PIL ugu wada guuleystaan iyo kaalinta afaraad oo ay ka galeen tartanka gobolka ee Class 6A.

Abaalmarinta Gatorade waxaa lagu aqoonsadaa ciyaartoyda taasi oo la xiriirta ciyaar wanaaga oo ay weheliso guusha tacliimeed iyo dhanka dabeecada.

**Kooxaha PIL oo helay sharaf dhanka tacliinta ah:** Saddex kooxaha ciyaaraha ee PIL oo kaalinta 1 ka galay tartankooda heerarka kala duwan ee Tacliimeed ee Gobolka oo Dhan ee OnPoint Community Credit Union ee kooxaha ee loogu talagalay jiilaalka.

Kooxaha waxaa darajo loogu kala yeelay qayb kasta iyada oo la eegayo GPA. Kooxda kubadda kolayga ee wiilasha Lincoln (3.77 GPA), kooxda dabaasha ee wiilasha Grant (3.88) kooxda lagdinta ee Cleveland (3.58) ayaa dhammaantood GPA ugu sarreysa ka keenay ciyaarahooda isboortiga ee dugsiyada Class 6A. Sidoo kale, Lincoln ayaa gashay kaalinta koowaad ee dhammaan kooxda qoob ka ciyaarka/ku tababarashada, ee hawsha tartanka ee ay soo qaban qaabisay OSAA.

Dhowr kooxood oo kale oo ka tirsan PIL ayaa galay 10 kaalmood ee ugu sarreeya ee Class 6A ee dhanka ciyaarahooda. Liiska oo buuxda waxaa laga heli karaa [osaa.org/awards](https://osaa.org/awards).